**Summad: XGG/048/2025** **17/02/2025**

**Ku: Wasaarada Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka** **Muqdisho**
**Ku: Agaasinka Golaha Wasiirada** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci ku saabsan Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare ee Tababarada iyo Horumarinta Sharciga.**

Xafiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tiixraacaya warqadda Summaddeedu tahay: **WCAD/XAWSHH/1998/2025,** ee ku taarikheysan **15/02/2025** kana soo baxday Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuyurka, ujeedadeeduna ahayd: **Dib u-soo Celin "Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Saree ee Tababarada iyo Horumarinta Sharciga.**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan **Sharci Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976**, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa Siyaasaddan oo ay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa shaqo, ugana bixiyo Talo Sharci.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ka dib markii uu dersay,wuxuu ku waafaqay Wasaaradda Wax ka badelka ay ku soo sameysay siyaasadii hore ay u ansixiyeen Golaha Wasiirada, islamarkaana Xafiiska Garyaqaanka Guud Waafajiyay Shuruucda Dalka, wuxuu ku talinayaa in siyaasaddan loo gudbiyo Golaha Wasiirada, maadaama aysan kahor-imaaneyn Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.

**FG:** Waxa halkan ku lifaaqan Siyaasadda Sare ku xusan.

**Wabillahi Towfiiq**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL
مكتب المحامي العام للدولة

**Avv. Muuse Axmed Ciise**

**Ku-Xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel: +252 (0)616658489, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so,

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
Xafiiska Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة العدل والشؤون الدستورية
مكتب مدير قسم التشريعات والاتفاقيات

Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

**SUMMAD: WCAD/XAWSHH/.1998./2025** **TR. 15/02/2025**

Mudane Garyaqaan,

**UJEEDDO: DIB-U-SOO-CELIN "SIYAASADDA QARAN EE DHISMAHA MACHAKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCIGAGA"**

Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka waxay soo gudbinaysaa "Siyaasadda Qaran ee Dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga" oo kaalin mug leh ka qaadanaysa nidaaminta iyo horumarinta Mihnadda sharci ee Soomaaliya.

Siyaasaddani waxay qeyb ka tahay hawlaha hortabinta u leh Xukuumadda Dan Qaran ee lagu horumarinayo mihnadda sharciga isla markaasna kor loogu qaadayo waxbarashada iyo tababarka mihnidleyda sharci ee JFS.

Haddaba, waxaa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa inuu ka guto waajibaadkiisa kaga aaddan arrintan, si loo saxo xubnaha Golaha Sare ee Machadka loona dhammeystiro habraaca ansixinta siyaasadaha sharci ee Xukuumadda JFS.

Wada-shaqeyn wacan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA CADAALADDA IYO DASTUURKA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MINISTRY OF JUSTICE AND CONSTITUTION

Mudane Xasan Axmed Cali
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,**
**Wasaaradda Cadaaladda iyo Arramiha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda =Muqdisho=
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=
Og: Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda & Arr. Dastuurka =Muqdisho=

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 16/02/2025

Address: Martine Hospital Road, Mogadishu – Somalia.
Email: legislative@moj.gov.so
Tell: 0615847146

Dr. Muuse iyo Xuseen
16/02/2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# WASAARADDA CADAALADDA & ARRIMAHA DASTUURKA

## SIYAASADDA QARAN
## EE
## DHISMAHA MACHADKA SARE EE TABABARKA
## IYO HORUMARINTA SHARCIGA

TUSMO

**SOO-KOOBITAANNO/SOO-GAABITAANNO ................................ 3**
**ARRAR........................................................................................4**
**HAB-RAACA DEJINTA SIYAASADDA ......................................... 7**
**SABABAHA SIYAASADDA ........................................................... 7**
**UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA ...............................................8**
**UJEEDDOOYINKA GUUD** ......................................................................8
**UJEEDDOOYIN GAAR AHAANEED**...................................................8
**CAQABADAHA WAXBARASHO SHARCIYEED ...........................9**
**XALINTA CAQABADAHA SIYAASADDA .................................. 10**
**SHURUUCDA LA XIRIIRTA WAXBARASHADA IYO MIHNADDA SHARCIYEED ...............................................................................11**
**DIB-U-HABAYNNO SHARCI ......................................................11**
**ILAHA MIISAANIYADA SIYAASADDA ..................................... 12**
**DHISMAHA MTHSH.............................................................13**
**QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS ............................................................................................. 13**
**GUUDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH..............................13**
**MAGACAABISTA GUDDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH...14**
**AGAASINKA FULINTA EE MSTHSH.........................................14**
**SOO JEEDINTA QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE .................15**
**HABRAACA OGGOLAANSHAHA KA MID NOQOSHADA MIHNADLAYAASHA SHSRCI EE SOOMAALIYA........................15**
**HIRGELINTA SIYAASADDA ..................................................... 16**
**KORMEERID IYO QIIMEYN .....................................................17**
**DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA ................................................ 18**

## SOO-KOOBITAANNO/SOO-GAABITAANNO

JFS= Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

WCAD= Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka

JUS = Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed

MSTHSH= Machadka Sare ee Tababarkaiyo Horumarinta Sharciga

BBA= Bulshada Bariga Afrika

**ARAR**

Xilligii gumeysiga, tababarka hawl-qabadka sharciyeed wuxuu ahaa mid aan ahmiyad la siinin. Ingiriiska iyo Talyaanigu waxay ku dhaqeen Soomaaliya nidaamyadooda sharciyeed, iyadoo hannaanka waxbarasho sharciyeed, qaanuunka garsoor, iyo shuruucda la xiriirta mihnadda sharciyeed, iyo weliba xeer-nidaaminta Qareenno, ay ku saleynaayeen nidaamka gumeystaha.

Horumarinta nidaamka waxbarashada sharciyeed ee JFS waxay bilaabatay muddadii uu jiray maamulkii daakhiliyada (Wasaayada). Machadka Jaamacadda Muqdisho waxaa la unkay 1956[kii] si uu u bixiyo waxbarasho sare ee sharci iyo dhaqaale muddo labo sano ah. Maaddooyinka sharciyeed ee lagu baranayey machadka waxay ka koobnaayeen dhammaan qeybaha shuruucda ee asaasiga ah oo ay ku jiraan shuruucda guud (public) iyo kuwa gaarka ah (private). Ardayda ku dhaqan Gobolada Koonfureed ee dalka, Ka dib marka ay dhammeystaan waxbarashadooda, waxay aadi jireen jaamacadaha Talyaaniga si ay u dhammeystirtaan shahaadooyinkooda jaamacadeed (Law Degrees). Halka Gobollada waqooyi ee dalka Ingiriisku gumeysanayey aysan lahayn machad bixiya waxbarasho sare. Sidaas awgeed, arday badan oo ka timid gobolada waqooyiga ayaa u kicitimay dalal shisheeye si ay ugu soo qaataan waxbarasho sare, sida sharciga iyo dhaqaalaha.

Muddadii ka dambaysay qaadashada xuriyada, xirfadleyaasha sharciyeed waxay u qeybsanaayeen saddex kooxood: doodeyaal, qareenno iyo kuwa ka shaqeeya Arrimaha shareecada Islaamka sida ku tilmaaman axkaamta **Sharci Lr.21 ee Juun 27, 1958**. Shakhsiyaadka haysta shahaado Jaamacadeed (Law Degree), marka ay ku shaqeeyaan tababarteyaal sharci

muddo labo sano ah ayna ka dib ka gudbaan imtixaanka uu qaado Golaha Qareennada ayna helaan oggolaanshihiisa, kuwa ka shaqeeya shareecada waxay ku hawl-galayeen la-taliyaal qeybta madaniga ee Maxkamadda Degmada, Maxkamadda Gobolka iyo Maxkamada Rafcaanka. Qofka ka shaqeeya Hawlaha Shareecada Islaamka waxaa looga baahaa in uu leeyahay aqoon ku filan ee Sharciga Islaamka, gelana imtixaan uu qaado guddi ka kooban garsoore iyo labo qaaddi shareeco. Hawl-wadeennada Shareecada waxaa magacaabi jiray Xoghayaha ee Cadaaladda Dawladda (Wasiirka Cadaaladda).

Waxaa kaloo jira sarkaal loo yaqaanno Nootaayaha Dadweyne oo lagu magacaabo si waafaqsan **Dekreeto Sharci-dejin Lr. 1 ee Maarso 2, 1962**. Nootaayada Dadweyne waxaa magacaaba Wasiirka Cadaaladda, waxaana xilalkiisa ka mid ah tasdiiqinta dokumentiyada sharciyeed, dardaaranada, kala-wareejinta dhulka iyo xeerarka shirkadaha.

Sanadkii 1969kii Dawladda Soomaaliyeed waxay dhistay Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) si waafaqsan **Dekreeto Sharci Lr.10 ee Luuliyo 14, 1969kii**, iyadoo Machadka Jaamacadda loo dalacsiiyey kulliyadda sharciga iyo dhaqaalaha oo bixinaysa koorsooyin sharci iyo kuwo dhaqaale muddo afar sano ah. Tartameyaasha haysta Diploma laga qaatay Machadka waxay mudnaayeen magacaabid Garsooreyaal Degmo, halka tartameyaasha haysta shahaado buuxda ee Jaamacadeed (law degree) ay mudnaayeen magacaabid Garsooreyaal Degmo ama Gobol.

Labaatan sano iyo dheeraad oo uu jiray nidaamkii melatariga ahaa ee Soomaaliya, ma jirin horumar la xusi karo oo la xiriira nidaaminta waxbarasho iyo mihnadda sharciyeed si waafaqsan hawl-qabadka ugu wanaagsan ee caalamiga ah. Sharciga Qareennada (Sharci Lr.85 ee Oktoobar 21, 1975) ayaa lasoo saaray si loo nidaamiyo mihnadda

qareennimada. Si hawl-qabad sharci loo sameeyo muddadii nidaamkii militariga ee Soomaaliya ka jiray, waxay ahayd in qofku dhammeystirto waxbarasho jaamacadeed ee Kuliyadda sharciga, isla markaana uu ka gudbo imtixaanka qareenimo oo ay maamuleysay Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta. Xeerkan waxaa wax-ka-baddel lagu sameeyey 1986 iyadoo la baabi'iyey Qodobbada 1aad ilaa 16aad ee Sharciga qareenimada oo ay ka dhalanayso baabi'inta Iskaashatada Qareennada Soomaaliyeed.

Marka la eego sharciga Nootaayooyinka ee Sharci Lr.1 ee Maarso 2, 1962 waxaa dib-u-eegis lagu sameeyey 1986 iyadoo nootaayooyinka laga saaray shaqaalaha Wasaaradda. Dawladdu waxay Dekreeto Lr.3 ee Janaayo 15, 1987 ku soo saartay Xushmadda Nootaayaha si loo nidaamiyo khidmadaha ay ka qaadayaan adeegyada.

Waxaa jiray dadaallo aad u yar, oo ku aaddan midaynta shuruucda is-khilaafsan ee khuseeya waxbrashada iyo mihnadda sharciyeed. Waxaa intaas dheer, inaan la siin muhiimaddii uu lahaa dhisidda machad tababar sharciyeed si uu u bixiyo tababarro sharci oo waafaqsan hal-beegyada heer gobol iyo mid caalami. Waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee Soomaaliya ayaa ah mid aan si sharci ah u nidaamsanayn. Waxaa adag in la helo siyaasad ama sharci loo dejiyay waxbarashada ama mihnadda sharciga ee Soomaaliya xilligii gumeysiga ama ka dibb. JFS weli ma dhisin machad takhasus sharci si uu u nidaamiyo una maamulo waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee Soomaaliya.

## HAB-RAACA DEJINTA SIYAASADDA

Siyaasaddan waxaa lagu diyaariyay hab daah-furnaan, wada-tashi, iyo ka-qeyb-qaadasho leh iyadoo la raacayo tilmaamaha Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Hab-raacu wuxuu bilowday 2023, muddadaas ka dibna, xeel-dheerayaasha sharci ee Wasaaradda ayaa si gaar ah ugu hawlanaa diyaarita Siyaasaddan.

Siyaasaddan waxaa lagu dejiyey habraac waafaqasan qaabka loo diyaariyo siyaasadaha sharci oo ay soo saarto Xukuumadda JFS iyo Hay'adaha dawlada si ay ula jaan-qaaaddo habraacyada kale ee Dalka ka jira.

## SABABAHA SIYAASADDA

Sababaha Siyaasaddan waxaa ka mid ah:

1. Baahidda wayn ah ee loo qabo "Dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga" oo qeyb weyn ka qaadanaya sare u qaadidda xirfadaha, aqoonta iyo dhisidda kartida mihnadlayaasha sharci.
2. Baahida loo qabo in la mideeyo tababarada sharci ee ardayda ka soo baxaya kulliyadaha sharciga ee Jaamcadaha dalka iyo dibadda.
3. Ku biiritaanka JFS ay ku biirtay BBA wuxuu keensanayaa in laga shaqeeyo sidii la isu-waafajin lahaa shuruucda, siyaasadaha, iyo xeer-nidaamiyeyaasha gudaha iyo kuwa BBA.

**UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA**

**UJEEDDOOYIN GUUD**

Ujeeddada guud ee siyaasadda waa:

1. In la dejiyo qaab-hawleedka sharci ee ku aaddan dhismaha, horumarinta iyo maareynta MSTHSH.
2. In ay wax ka beddesho, midayso, oo ay dejiso siyaasado khuseeya waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.

**UJEEDDOOYIN GAAR AH**

Siyaasaddu waxay xaqiijinaysaa ujeeddooyinka gaar ahaaneed ee soo socda:

1. Waxaa lagu dhisayaa MSTHSH si uu u bixiyo tababar sharciyeed oo wax-ku-ool ah (Practical) iyo mid gaar ahaaneed oo la xiriira qeybaha kale ee sharciga.
2. Waxay bixinaysaa hagitaanno ku aaddan diyaarinta shuruucda, xeer-nidaamiyeyaasha, hal-beegyada iyo hab-raacyada kale ee la xiriira waxbarashada sharciyeed ee dalka.
3. Waxay ka qeyb-qaadanaysaa horumarinta manhajka, hageyaasha tababarka, hababka imtixaanka ee hawl-wadeennada sharciyeed.
4. Waxay abuuraysaa hannaan dhaqaale oo wax-ku-ool ah oo lagu hirgelinayo ujeeddooyinkeeda.
5. Waxay kor u qaadaysaa iskaashi lala wadaago hay'adaha gaarka loo leeyahay, kuwa caalamiga ah iyo hay'adaha tacliinta.
6. Waxay kobcinaysaa cilmi-baaris sharciyeed iyo in ay ka qeyb-qaadato dib-u-habaynnada nidaamka sharciyeed ee JFS.
7. Waxay xoojinaysaa talinta sharciga iyo Dastuurka si loo bari-taaro dawladnimada, horumarinta dhaqaalaha iyo xallinta khilaafaadka.

**CAQABADAHA WAXBARASHADA SHARCIYEED EE SOOMAALIYA**

Nidaamka waxbarashada sharciyeed ee JFS wuxuu wajahayaa caqabado dhawr ah waxaana ka mid ah:

1. Iyadoo aysan jirin machad tababarid sharciyeed ee ka shaqeeya bixinta tababarada qareennada, sharciyaqaannada, garyaqaannada iyo kuwa ka hawl-gala xarumaha cadaaladda.
2. Iyadoo aysan jirin siyaasad guud iyo hal-beegyo ku aaddan waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.
3. Iyadoo wali Soomaaliya ay ku dhaqanto shuruucdii Qarnigii 20aad iyo hannaan sharciyeed oo aan nidaaminayn arrimaha la xiriira waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.
4. Yaraansho mihnadleyaal sharciyeed ee tababaran oo awood u leh fulinta hawlaha culculus ee shuruucda Soomaaliyeed, goboleed iyo caalamiyeed.
5. Is-khilaaf iyo kala-duwanaan nidaam sharciyeed – sharci, xeer-dhaqameed, sharci Islaam, sharci guud, sharci madani, axdiyo goboleed iyo caalami.
6. Nuglaanta qaab-hawleedka hay'adaha taasoo dib-u-dhac ku sababaysa helitaanka cadaaladda ee muwaadiniinta.
7. Isbeddello teknoolojiyadeed ee dheereeya iyo wax-is-dhaafsiga ganacsiyeed ee dhijitaalka ah ee heerarka goboleed iyo caalami.
8. Axdiga lagu dhisay BBA ee ay JFS meel-marisay waxaa loo baahan yahay in dhammaan qaramada Xubnaha ka ah ay is-waafajiyaan shuruucdooda, siyaasadahooda iyo xeer-nidaamiyeyaashooda shuruucda BBA.

9. Hawl-qabadka ka-gudubka xudduudda, sharciyaqaanka Soomaaliyeed wuxuu u baahan tababar gaar ahaaneed si uu u hortago maxkamadda BBA iyo maxkamadaha caalamiga ee kale.
10. Manhajka kulliyadaha sharciga ee Soomaaliya ma ahan mid si mug leh ula jaan-qaadi Kara Qarniga 21[aad].
11. Suuqa shaqada ee adeegyada sharciyeed ee JFS wuxuu wajahayaa tartan lixaad leh oo uga imaanaya sharuucda gobolka sida BBA iyo Shirkadaha aan ahayn kuwa Bixiya Adeegyada Sharci.

## XALINTA CAQABADAHA SIYAASADDA

Si ay u xaliso siyaasaddan caqabadaha jira, waa in la dhaqan-geliyo tallaabooyinka soo socda:

1. WCAD waxay dhisaysaa MSTHSH si loo tababaro shakhsiyaadka noqonaya mihnadle-sharci iyo in ay xaqiijiso joogteynta horumarinta dhammaan hawl-wadeennada mihnadda sharciyeed.
2. WCAD waxay midaynaysaa, habaynaysaa barnaamijyada, muqorarka iyo hab hawl-gal kale ee khuseeya waxbarasho sharciyeed si loo helo oggolaansho goboleed iyo ku-talo-galnimo in sharciyaqaannada Soomaaliyeed ee ka bilaabay tababarkooda mihnadeed gudaha dalka ay heli karaan aqbalaad heer caalami ah.
3. WCAD waxay horumarinaysaa xeer-nidaamiyeyaal, shuruuc, hab-raacyo, iyo halbeegyo ku aaddan waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed ee dalka.

## SHURUUCDA LA XIRIIRTA WAXBARASHADA IYO MIHNADDA SHARCIYEED

Ka dib xoriyadii Soomaaliya Dawladdii rayidka iyo Nidaamkii Militariga waxay ansxiyeen shuruuc badan iyo siyaasad-sharciyeed si loo nidaamiyo loona mideeyo nidaamyadii sharciyeed ee la dhaxlay oo kala duwanaa.

Qaar ka mid ah shuruucdii xilligaas waxaa ka mid ah:

1. Sharciga Nidaamka Garsoorka, Sharci Lr.5 ee 1962;
2. Xeerka Nootaayooyinka (Dekreeto Sharci-dejinLr.1 ee Maarso 2, 1962);
3. Sharciga Jaamacadda Ummadda, Sharci Lr.6 ee Diseembar 1, 1969;
4. Sharciga Qareennada (Sharci Lr.85 ee Oktoobar 21, 1975);
5. Sharciga Qareennada (Wax-ka-beddel) Sharci Lr.3 ee Janaayo 13, 1986;
6. Dib-u-eegista Sharciga Nootaayooyinka, Sharci Lr.7 ee Feberaayo 2, 1986; iyo
7. Khidmada Nootaayooyinka, Dekreeto Lr.3 ee Janaayo 15, 1987;

## DIB-U-HABAYNNO SHARCI

Si loogu hirgeliyo siyaasaddan si wax-ku-ool ah oo dhammeystiran, waxaa lagu sameynayaa dib-u-habayn sharciyeed oo ku habboon. WCAD waxay dib-u-eegaysaa oo meel-marinaysaa shuruucda la xiriirta:

1. Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH) ee JFS si loo dhiso machad tababar hawl-qabad sharciyeed oo ka hana-qaada dalka.
2. Sharciga Ururka Qareennada Soomaaliyeed si loo nidaamiyo Urarada Sharciyaqaanada Dalka. isla markaasna ay u helaa oggolaanshaha iyo

hawl-qabadka garyaqaannada, sharciyaqaannada, iyo mihnadleyaasha sharciyeed ee kale ee gudaha JFS.

3. Sharci Nootaayooyinka Dadweyne si loo sameeyo hal-geeyo lagu magacaabayo Nootaayaha iyo laguna Xadidaayo Hawlahooda.
4. Xeer-hoosaadka qeexaya Khidmadaha Qareenka si loo nidaamiyo xushmaddiisa iyo khidmadaha sharciyeed.
5. Anshax-marinta Qareennada si wax looga qabto dacwadaha ku saabsan anshax-xumada mihnadeed.

## ILAHA MIISIINIYADDA HIRGELINTA SIYAASADDAN

Hirgelinta siyaasaddan waxaa lagu maal-gelinayaa hababka soo socda:

1. Qoondayn miisaaniyad sanadle ah. WCAD waxay xaqiijinaysaa in sanad-miisaaniyadeed kasta, dawladdu u qoondayso miisaaniyad loogu talo-galay hirgelinta Siyaasaddan.
2. Dakhli ka yimaad hay'adaha dadweynaha iyo kuwa gaar loo leeyahay, gaar ahaan dhanka horumarinta kaabeyaasha ee MSTHSH.
3. Deeqo iyo gargaarro laga helo gudaha iyo dibadda.

   WCAD oo kaashanaysa miisaaniyadda qaranka waxay xaqiijinaysaa in la helo isku-duwid gargaar waxtar leh ee dhammaan miisaaniyado horumarin oo lagu bari-taarayo dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH).
4. Maal-gelinta hay'adaha gaarka loo leeyahay ee mashaariic iyo barnaamijyo la xiriira hirgelinta siyaasaddan.
5. Khidmadaha iyo xushmadaha laga helo waxbarashada iyo la-talinta uu bixiyo machadka.

**DHISMAHA MSTHSH**

1. Siyaasaddan waxaa lagu hirgelinayaa iyadoo loo marayo dhisidda MSTHSH.
2. Siyaasadda waxay xaqiijinaysaa in uu Machadku noqdo mid ku dhisan sharci asigoo u madax-bannaan gudashada xilka iyo waajibaadka loo idmaday lehna Astaan iyo shaabbad u gaar ah.
3. Machadku wuxuu hoos imaanayaa WCAD.

**QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS**

Qaab dhismeedka maamul ee MSTHSH wuxuu ka koobanaanayaa:

1. Guddiga sare (Board of Directors ) ee MSTHSH iyo;
2. Agaasinka Fulinta ee MSTHSH.

**GUDDIGA SARE EE MAAMULKA MSTHSH (BOARD OF DIRECTORS) IYO SIDA XUBNIHIISU KU IMAANAYAAN**

Siyaasaddani waxay adkaynaysaa muhimadda dhismaha guddiga sare (Board of Directors) ee MSTHSH si uu u dejiyo aragtida iyo istaraatijiyadda, lagu hawlgalinayo MSTHSH, sidoo kalena ku korjoogteeyo fulinta aragtiyadaas agaasinka fulinta.

Guddiga Sare ee MSTHSH oo tiradiisu ay tahay 11 xubnood, waxay ka kala imaanayaan hay'adaha hoos ku tilmaaman:

a. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WCAD -Guddoomiye-
b. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WWHTS -xubin-
c. Xoghaye Joogto/Agaasime Guud, WM -xubin-
d. Garyaqaanka Guud ee Dawladda (GGD) -xubin-
e. Maxkamadda Sare ee Dalka -xubin-
f. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka -xubin-
g. Ururka Qareennada Soomaaliyeed -xubin-
h. Ururka Nootaayooyinka Soomaaliyeed -xubin-

i. Hormuudka Kulliyadda Sharciga ee JUS -xubin-
j. Midowga Jaamacadaha Soomaaliyed -xubin-
k. Agaasimaha MSTHSH -xoghayn-


**MAGACAABISTA GUDDIGA SARE EE MSTHSH**

Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka WCAD ayaa Dekreeto kusoo saaraya saraakiisha sare ee xubnaha ka noqonaya Guddiga Sare ee Maamulka MSTHSH (Board of Directors), ka dib markay si qoraal ah ku soo magacaabaan madaxda hay'adahooda.

**AGAASINKA FULINTA EE MSTHSH**

1. Siyaasaddu waxay soo jeedinaysaa in machadku uu yeesho Agaasime fulineed sare, oo noqonaya Agaasimaha MSTHSH, sidoo kalena u hawl-gelaya xoghayaha Guddiga Sare ee MSTHSH.
2. Wasiirka cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa magacaabaya Agaasimaha machadka iyo ku-xigeennadiisa ee muddo Shan sano ah oo la cusboonaysiin karo.
3. Agaasinka fulinta ayaa diyaarinaya qorshaha hawlgalinta machadka, iyo dhammaan waxkasta oo lagama maarmaan u ah hirgalinta shuruucda, siyaasadaha iyo ujeedooyinka loo aasaasay MSTHSH, isagoo u soo gudbinaya Guddiga sare MSTHSH si ay ugu ansixiyaan.
4. Agaasimaha machadka, ku-xigeennadiisa waxaa la xisaabtamaya Wasiirka WCAD.
5. Machadku wuxuu abuuran karaa faracyo ka hawl-gala qeybaha kale ee dalka.

**SOO JEEDINTA QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL EE MACHADKA SARE EE TABABARKA IYO HORUMARINTA SHARCI (MSTHSH) EE JFS**




## Habraaca Oggolaanshaha ka mid noqoshada Mihnadleyda Sharci ee Soomaaliya:

1. Siyaasadan waxay qorsheyneysaa isla markaasna nidaamineysaa habraaca oggolaanshaha kamid noqoshada Mihnadleyaasha sharci inay maraan habraaca u degsan urur-goboleedyada aan qeybta ka nahay si ay ula jaan-qaadaan shuruucda iyo habraacyada ay ku dhaqmaan urur-goboleedyadaas sidaas daraadeed, machada wuxuu dhaqan-gelinayaa Habraac wax-ku-ool ah oo wax looga qabanayo arrimahaas.

2. Qofka ka mid noqonaya Mihnedleyaasha Sharci waa inuu haystaa Shahaadada koowaad ee Shareecada iyo Qaanuunka ama midkood uu ka qaatay jaamacad la aqoonsan yahay, isla markaasna dhameystay MSHSH.

3. In Xafiis Qareen uu ka qaato Tababar 6 bilood ah. Leeyahayna Akhlaaq iyo anshax wanaag isla markaasna aan ku sifoowin anshax-xumo baahsan.

## HIRGELINTA SIYAASADDA

Hirgelinta siyaasaddan waxay u baahan tahay iskaashi ujeeddo leh oo ka dhexeeya hay'adaha cadaaladda, Xeer-ilaalinta, Xafiiska Garyaqaanka Guud, Bixiyeyaasha waxbarasho sharciyeed (Jaamacadaha), Ururka Qareennada, Garsoorka iyo Wasaaradda Waxbarashada. Habkan wadajirka ah wuxuu xaqiijinayaa in siyaasaddu ahaato mid waafaqsan qaab-hawleedyada iyo hal-beegyada sharci-dejineed ee heer qaran, heer goboleed iyo heer caalami, iyadoo ay ku jirto Heshiiska la xiriira BBA iyo Borotokoolkiisa oo ay Soomaaliya saxiixday.

Sida kor ku xusan, yoolka siyaasaddan waa dhisidda MSTHSH si loo siiyo Hawl-wadeenada Sharciga waxbarasho iyo tababarro sharciyeed oo Wax-ku-ool ah.

Machadku wuxuu kaalin mug leh ka qaadanayaa bixinta tababar la siiyo ardayga jaamiciga ah iyo diyaarinta cilmi-baarisyo ku aaddan arrimaha la xiriira waxbarashada iyo mihnadda sharciyeed.

Waxaa intaas wehliya, siyaasaddu waxay wax ka qabanaysaa walaacyo mug leh, sida yaraanshaha mihnadleyaal sharciyeed oo tababaran, helitaanka xaddidan ee waxbarasho iyo tababarro sharciyeed oo tayo leh iyo baahi loo qabo dib-u-habayno sharciyeed si dhaqan ahaan iyo nidaamyo sharciyeed oo casri ah iyadoo la waafajinayo hal-beegyada caalamiga ah iyo Heshiiska BBA.

Ugu dambayn, siyaasaddani waxay xoojineysaa talinta sharciga, nabad-dhisidda iyo horumarinta Soomaaliya. Habka iskaashiga, uma laha keliya faa'iidooyin hawl-wadeennada sharciyeed balse wuxuu sidoo kale ka qeyb-qaadanayaa xasilloonida bulshada guud ahaan.

Marka Golaha Wasiirraddu ansixiyo siyaasaddan, Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka wuxuu bixinayaa hagitaanno ku aaddan tallaabo

maamul iyo maareyn ee Machadka ka hor inta aan la meel-marin sharciga lagu maamulayo MSTHSH. hagitaanadan waxay ka qeyb-qaadanayaan dhisidda iyo maareynta machadka. Iyadoo ay ku jirayaan Hawlaha iyo mas'uuliyadaha agaasimaha fulinta ee machadka kana kooban hay'adda maamulka Machadka. hagitaanadan waxay ku talinayaan in dedejin meel-marineed lagu sameeyo dhisidda iyo hawl-galka machadka iyo sidoo kale in ay fududayso qorsheynta, hirgelinta iyo kormeerka siyaasaddan.

**KORMEERID IYO QIIMEYN**

Mas'uuliyadda guud ee kormeeridda iyo qiimeynta Siyaasadda Qaran ee ku aaddan waxbarashada iyo dhismaha MSTHSH waxay saaran tahay WCAD. Xaqiijinta ujeeddooyinka siyaasaddan waxay u baahnaanaysaa kormeerid iyo qiimeyn joogto ah oo lagu fulinayo iskaashiga wasaaradaha kale ee ay khuseyso, hay'adaha iyo wada-hawl-galeyaasha caalamiga ah. Hab-raaca kormeerka iyo qiimeynta waxay hageysaa ururinta xog waqtiyaysan iyo falanqeynta horumarka laga gaaray hirgelinta siyaasadda. WCAD waxay horumarinaysaa kormeerka iyo natiijooyinka ku saleysan qaab-hawleedka qiimeynta. Qaab-hawleedka la xusay wuxuu cayimayaa, meelaha ay dhibaatadu ka jirto oo ay tahay in la xaliyo, bar-tilmaameedyo waxqabad, miisaaniyado iyo waqtiyeyn ku aaddan hirgelinta siyaasaddan. Qaab-hawleedka waxay ahaanaysaa mid wax-ku-ool ah ee qiimeynta ka qeyb-qaadashada siyaasadeed ee ajendaha horumarinta dalka iyo bixin fal-celin guulaha, horumarka iyo caqabadaha la xiriira hirgelinta siyaasadda iyo in natiijo laga gaaray.

**DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA**

Siyaasadda qaran ee ku aaddan waxbarashada iyo dhismaha Machadka Sare ee Tababarka iyo Horumarinta Sharciga (MSTHSH) ee JFS waxaa lagu sameynayaa dib-u-eegis 5 shantii sanaba mar ama waqti kasta oo ay soo if-

baxdo baahi ku timid is-baddelka dabeecadda ee hawl-qabadka sharciyeed ee MSTHSH.